## INTEE JEER AYAAN QAADANAYAA DAWADAYDA?

Qadarka dawada qaadashada lagu taliyay waa labba qalab oo dawo oo la nuugi (buufimo) labba jeer maalintii. Labbada habbeenimo iyo labbada fiidnimo, ama sida uu faro dhakhtarku.

Had iyo jeer biyo ku shub afkaaga ka dib dawa qaadashada labbaad.

## MA SII WATAA ISTICMAALKA FLUTIFORM® XATAA HADDII AANAN LAHAYN WAX ASTAAMAHA XIIQDA AH?


Si loo gaadho saamayn buuxda waa muhiim inaad qaadato dawadaada xiiqda maalin kasta, xataa haddii aanad dareemin wax astaamo ah. Had iyo jeer raac tilmaamaha dhakhtarkaaga.

## GOORMAAN BEDDELAYAA QALABKA DAWADA EE LA NUUGI?

Guudka qalabka dawada la nuugo waxaa ku yaalaa tiriyaha midabka summadaha leh ee dawa qaadashada kaas oo muujiya marka aanay jirin wax dawo qaadasho ah oo hadhay. Qalabka dawada ee la nuugaa waxa uu ka koobanyahay 120 buufimo, taas oo u dhiganta 60 isticmaal.

## MIDABKA SUMMADA HAGAHA:

Ee u dhexaysa 120 iyo 50 buufimo xaga dambe waa cagaar.




Inta u dhexaysa 49 iyo 30 buufimo xaga dambe waa jaalle.




Inta u dhexaysa 29 iyo 0 buufimo oo hadhay xaga dambe waa casaan. Marka tiriyaha dawa qaadashadu uu cas y ahay waa wakhti degdeg ah in la beddelo qalabka dawada ee la nuugo.




Hadda waxaad ogtahay macluumaadka ugu muhiimsan ee ku saabsan flutiform®.
Wixii macluumaad dheeraada ah, eeg xidhmada warqadda yar ama booqo fass.se

MACLUUMAADKAN WAA IN UU GUDBIYAA DHAKHTARKAAGA AMA KALKAALISADA

flutiform®
flutikasonpropionat/formoterol

Mundipharma AB, Mölndalsvägen 30B,
SE-412 63 Göteborg, +46 (0)31 773 75 30,
info@mundipharma.se, www.mundipharma.se

17-FLU-25-CAH-AUG-2017
circuscom.se

MACLUUMAADKA BUKAANKA

# FLUTIFORM®
# *– dawadaada cusub ee xiiqda*

SOMALISKA




flutiform®
flutikasonpropionat/formoterol

**Waxaad heshay dawada buufimada ee flutiform®, taas oo loo isticmaalo joogtaynta daawaynta xiiqda.**

**Flutiform® waa isku darka labbada dawo oo ku jirta hal qalab oo la nuugo fluticasone propionate taas oo yaraysa bararka iyo ololka marinka neefsashada iyo formoterol, dawada balaadhisa marinka sambabka oo si dheer wax u tarta taas oo fududaysa in la neefsado.**

Haddii astaamaha xiiqda ay dhacdo muddada u dhexaysa labba dawo qaadasho, mid muddo gaaban wax taraysa ß2 waa in la nuugo wixii ah baabiinta xanuunka degdega ah.

**Fadlan daawo filimkayaha tilmaanta ah**

Sawir kaga qaad summada QR ee sare telefoonkaaga casriga ah.

Akhriyayaasha QR waxaa laga heli karaa App Store ama Android Market. Waxaad filimka sidoo kale ka heli kartaa medicinsinstruktioner.se

## WAKHTIGA UGU HOREEYA EE AAD ISTICMAASHA FLUTIFORM®

**Ka hor inta aanad isticmaalin dawada la nuugo ee flutiform® wakhtiga ugu horaysa waa inaad diyaariso dawada la nuugo. Tan sidoo kale waa la adeegsadaa haddii aanad isticmaalin qalabka dawada ee la nuugo saddex ama maalmo ka badan.**

**Sida loo diyaariyo qalabka dawada ee la nuugo.**




Ka saarka daboolka ilaalinta afka qalabka la nuugo.




Sare u taag qalabka la nuugo.

U rux qalabka la nuugo hore iyo dib dhowr wakhti.




Ha isku beegin afka qalabka dawada adigu. Hoos u cadaadi qalabka dawada oo siidaa buufimada. Ku celi tan afar jeer.

Qalabka dawada la nuugo hadda way fududahay in la isticmaalo.

## SIDA LOO ISTICMAALO QALABKA DAWADA LA NUUGO




Ka saar daboolka ilaalinta qalabka la nuugo oo hubi in afku uu nadiif yahay.




Sare u taag qalabka la nuugo.

U rux qalabka la nuugo hore iyo dib dhowr wakhti.




Dib neefta u soo saar markaas sambabadaada way ka madhnaanayaan wixii hawo ah. Hoos u foorari afka qalabka dawada ee la nuugo. Ku xidh dibnaha afka qalabka dawada ee la nuugo. Ha qaniinin.




Bilow mid qoto dheer, degen, oo neefsasho gudaha ah, hoos u riix qalabka dawada ku jirto si aad si degen ugu neefsato oo qoto dheer (si la door bidayo ilaa 4–5 ilbidhiqsi).




Neefta isku xeji ilaa inta aad ka dareento raaxo oo ka daar dawada la nuugo afkaaga.

Ku dhammee addoo si degen u neefsanaya. Dawa qaadashada tirada labba ku celi tallaabooyinka 2-4.




Xusuuso inaad had iyo heer afka biyo ku shubto ama aad caddayato. Soo tuf biyaha marka aad afkaaga ku shubto.